



Comitato Internazionale per lo Sviluppo dei Popoli – CISP (Guddiga Caalamiga ah ee Horumarinta Dadka) waa Urur aan dowli ahayn oo Roma lagu aasaasey 1983dii, si uu wax uga qabto saameynta saboolnimada iyo xuquuqaha la duudsiyey dunida oo dhan. Dabargoynta saboolnimada, abuurista xaaladaha lagama-maarmaanka u ah horumarka, sameynta waddooyinkii loo mari lahaa dib-u-dhiska, iyo gacan ka geysashada xaaladaha degdegga ah ayaa ah ujeedooyinka ugu muhiimsan ee CISP higsaneyso.

CISP waxaa ay ka shaqeysaa dalal 30 ka badan oo guud ahaan dunida ku baahsan: Afrika, Latin Amerika, Kareebiyanka, Aasiya, Bariga Dhexe iyo Yurub. [Xarunta Weyn](#) waxa ay ku taallaa Roma, iyada oo xafiisyo goboleedyana ay ku yaallaan guud ahaan Talyaaniga iyo dalalka ay ka shaqeyso.

Waxqabadyada ay CISP ka waddo guud ahaan dunida

Where we work



Min saboolnimo ilaa sharaf: mabaa diida dhiirrigeliya waxqabadka CISP



Hawsha CISP waxaa ugu muhiimsan aaminaadda aan aaminsanahay in helidda alaabada iyo adeegyada aasaasiga ah, cuntada iyo nolol sharaf ku dhisani ay yihiin xuquuqo uu qof kasta leeyahay oo aan la duudsiin karin. Waxqabadka CISP waxaa dhiirrigeliyey in xuquuqahan aan cidna la duudsiin karin, gaar ahaanna:

- 1. **Xuquuqda loo leeyahay helidda gacan-qabashada cayrta iyo gacan-qabasho dhaqaale:** CISP waxa ay aaminsan tahay in horumarka dhaqaale uu yahay waddadii looga bixi lahaa saboolnimada laguna gaari lahaa sharaf. Si gacan ay uga geysato sidii dadku ay u heli lahaayeen xuquuqdan aan la duudsiin karin, CISP waxaa ay dhiirrigelisaa mashaariicda ay ka mid yihiin hawlo dakhli lagu abuurayo, waxaana ay gacan siisaa dadka isku dayaya in ay ka

baxsaan saboolnimada ba'an ama kuwa ku khasbanaadey in ay u qaxaan iskahorimaadyada iyo dhibaateynta daraaddood. Dadaalka CISP waxaa uu sidoo kale ku wajahan yahay sidii wax looga qaban lahaa gaajada iyo nafaqo-xumada, sidii loo hubin lahaa in qof kasta uu helo qiyaas cunto caafimaad iyo nafaqo leh oo ku filan (ka-haqab-beelidda cuntada);

2. Xuquuqda helidda daryeel caafimaad iyo biyo: Biyuhu waxaa ay muhiim u yihiin wanaagga (bedqabka) qofka oo daryeel caafimaad oo dad ku filan ayaa ah xuquuq bani'aadam oo aasaasi ah. Hawlaha CISP waxaa ay ku taamayaan in la ballaariyo helitaanka dadka ee biyo nadiif ah oo la cabbo iyo in la wanaajiyo xaaladaha caafimaad ee badi dadka nugul ee ilaalinta ay helaanna ay yar tahay;

3. Xuquuqda loo leeyahay mustaqbal wanaagsan: Dadaalka CISP waxaa uu ka soo askumey fikradda ah in ilaalinta iyo taageeridda xuquuqaha carruurta iyo dhallinta qaangaareysa u leeyihiin in ay koraan oo ay kobcaan, iyo sidoo kale in la ilaaliyo lana wanaajiyo deegaanka, in ay ka dhigan tahay maalgelin lagu sameeyey mustaqbalka bulshada iyo guud ahaan kownka/dunida;

4. Xuquuqda helidda gargaar bani'aadamnimo: Hawlaha bani'aadamnimada ee CISP waxaa hagaya mabda'a ah in qof kasta iyo bulsho kastaa ay xaq u leeyihiin ilaalin, karaamo iyo sharaf;

5. Taageeridda bulshada rayidka ah iyo siyaasadaha dowladda si loogu gaaro midnimo bulsho: Saboolnimada iyo dayrada ay bulshadu sameyso ayaa badanaaba ka dhasha

sinnaan la'aan qoto dheer oo u dhaxaysa shakhsiyaadka iyo kooxaha bulshada. Hawsha CISP ee ku aaddan arrimahan waxaa ay ka bilaabataa ogaansho la og yahay in dowladaha, bulshooyinka degaanka iyo maamulladu ay yihiin qaybaha ugu waaweyn ee mas'uulka ka ah horumarinta dhulkooda.

Eeg [Ee Baaqa CISP ee Waxa ay ka qabaneysa "Xuquuqaha iyo Saboolnimada"](#) .

Eeg [Siyaasadaha CISP](#) .